



## **MA INAAN KA JAWAABAA SU'AALAHA BOOLISKA?**

Haddii ay ku joojiyaan oo ay ku su'aalaan booliska, ama ay ku gula hadlaan mudaaharaadka, waxaad xaq u leedahay **INAADAN** u jawaabin, illaamaa aad ka qeybqaadanaysid hab dhaqanka “bulshada lidka ku ad” (oo sababayo, ama ay u badantahay inay keento “dhibaateyn, qeylo ama murugo”). Waa inaad siinin warbixin been ah booliska, maadaama tan ay tahay fal dambi . Laguma baari karo ama laguma xiri karo kaliya inaad si sharci ah u diiday inaad ka jawaabtid su'aalaha.

## **MA XAQ BAAN U LEEYAHAY INAAN KA MUDAAHARAADO?**

Haa. Xaquuqdaada aad ku mudaaharaadeysid waxay ku dhowran tahay Xeerka Xaquuqal Insaanka oo waxaa si sharci ah u xadidi karo booliska ujeedooyinka la qeexay qaarkood (sida ka hortaga dambiga ama qalqal gelinta) iyo qaab ku haboon. Wixii warbixin dheeraad ah iyo tilmaanta ku saabsan abaabulista mudaaharaad, awoodaha booliska ee lagu xadidayo ama lagu mamnuucayo mudaaharaadyo, iyo xaquuqaahaaga haddii lagu xiro, booqo [libertyhumanrights.org.uk/advice-and-information](https://libertyhumanrights.org.uk/advice-and-information) oo ka dooro mowduuca mudaaharaadka', ama isticmaalka koodhka QR.

**I.LIBERTY**



migrants  
organise



*Warbixintaan waxay aheyd sax laga bilaabo 3 Maarso 2022.*





## MAXAAN SAMEEYAA HADDII LA I XIRO?

Intaan lagu xirin booliska waa inuu kuu sharaxaa in lagu xirayo iyo sababta. Haddii lagu xiro, kaga jawaab **“NO COMMENT” (FAALO MA JIRTO)** dhammaan su'aalaha oo **HA** aqbalin taxadar illaa aad ka heshid tallo sharci. Tallo ka dalbo qareenka taqasuska u leh sharciga mudaaharaadka (fiiri hoos). Waxaad xaq u leedahay inaad:

- wax uga sheegtid qof xiritaankaaga
- heshid turjubaan haddii af Ingiriiska uusan aheyn luuqadaada koowaad
- qof weyn oo ku haboon haddii aad ka yartahay 18 ama qof nugul aad tahay



Sharci ahaan **LAGAAGAMA** baahno inaad la wadaagtid dhalashadaada ama heerka socdaalka markii lagu xiro, inkastoo booliska laga yaabo inay midaan fiiriyaan haddii ay ka shakiyaan inaad aheyn muwaadin Biritish ah. Wixii tilmaan ah ee ku saabsan saameynada xiritaanka mudaaharaadka, arag: [jcwi.org.uk/immigration-advice-for-protestors](http://jcwi.org.uk/immigration-advice-for-protestors)



## QAREENADA BIXINAYO TALO IYO KORMEERAYAASHA SHARCIGA OO BILAASH AH 24 SAAC:

**QAREENADA ITN** 020 3909 8100

**HODGE JONES & ALLEN** 0844 848 0222

**KELLYS** 01273 674 898 / 0800 387 463

**COMMONS** 020 3865 5403

**BINDMANS** 020 7305 5638

**MTC** 07956 308 127

**BPLS** @blkprotestlegal / blackprotestlegal@protonmail.com

**GBC** @GBCLegal / 07946 541 511 / courtsupport@protonmail.com